# RAG IYO RABBI

## Suugaan Nabadeed
**Soomaaliyeed**

Aweis A. Ali

Maandeeq Publishing

## HORDHAC

Maansada buuggan dhex ceegaagta waxaa la curiyay dhammaantood (mid mooyee) 1994-1995. Dabcan af- Soomaali ayaa lagu curiyay suugaantan waxaana durba u turjumay af Ingiriis gabyaaga. Howlgalkii Qaramada Midoobay ee rejo soo celinta Soomaaliya (UNOSOM) ayaa ku martiqaaday suugaanlayda Soomaaliyeed in ay hab tixeed uga qayb qaataan nabadaynta dalka. Suugaanlay badan ayaa dalbaday in ay ololahaas ku nabadaynta suugaanta ka mid noqdaan balse waxaan ka mid ahaa tiro maansooleey Soomaaliyeed oo shan ahaa oo Waaxdii Saxaafadda ee UNOSOM ay dooratay. Ragga kale ee la doortay waxaan ka xusuustaa Maxamed Cali Kaariye iyo Maxamed Gacal Xaayow. Raggaas ayaa magac weyn ku leh fanka iyo sugaanta Soomaaliyeed.

Waxaan u bixiyay buuggan Rag iyo Rabbi waayo marka xaajo gurrucanto ayay Soomaalidu sheegtaa in loo baahan yahay rag iyo Rabbi si looga baxo murrugmaarrugta. Waxaa kale oo intaas dheer in Soomaalidu ku maahmaahdo, jinni ninki keenaa bixiya. Maadaama raggu ay dhaliyeen dhibaatada colaadeed ee dalka jilbaha dhulka u dhigtay, micne wayn ayay samaynaysaa in ay iyagu xalka keenaan iyaga oo kaashanaya Rabbiga. Dalku weli wuxuu u baahan yahay rag iyo dumar iskaashada oo Eebbe talo saarta si loo demiyo dabka weli huraya

# TAARIIKHDA GABAYWALBA

## 1. Istaqfurulah

Gabaygani waa duco aan Eebbe ku baryayo in uu dhibaatada ka dulqaado kana joojiyo dagaalka sokeeye ee xilligaas aafeeyay dad iyo dalba.

## 2. Bad Yahay I Maqal

Gabaygan waxaan tiriyay markii shaqadii aan ka hayay UNOSOM, howlgalkii Qaramada Midoobay ee rejo soo celinta Soomaaliya sanadku markuu ahaa 1995. UNOSOM ayaa xilligaa ka baxday Soomaaliya. Waxaan ka mid ahaa shaqaalihii ugu dambeeyay ee UNOSOM aniga oo agaasimay agab badan oo UNOSOM lahayd oo loo daad gureeyay dalalka Talyaaniga iyo Rwanda. Mashruuc kalluumaysi ayaan xilligaas ka billaabay koonfurta Soomaaliya. Gabaygan ayaan u tiriyay Badweynta Hindiya oo khayraad badani dhex ceegago. Waxaan xeebaha kalluumaysiga u sharraxayaa waxaan uga soo guuray Xamar oo aan xeebta u soo degay. Waxaan u sheegayaa badda waxa aan ka filayo in aan helo oo ah nabadgelyo iyo nafaqo.

## 3. Eebbow Innoo Birmo

Gabaygani waa mid duco ah aniga oo Eebbe ku waydiisanaya suugaantan in uu badbaadiyo Soomaalida dhibaataysan. Waxaa kale oo aan bidhaaminayaa xanuunka ku dhacay mid ka mid ah

wadamada Afrika kuwa ay dadkoodu isleeyihiin.

## 4. Aan Butaacsho

Waxaan gabaygan ku cabbirayaa culayska dagaalka sokeeye kula kufay ummadda Soomaaliyeed. Waxaan misna ku sheegayaa in dad labawejiileyaal ahi ay huriyaan dhimbilaha colaadda. Waxaa kale oo aan hoosta ka xarriiqayaa in dhibka jiraa ay Soomaalidu iyagu isu gaysteen.

## 5. Na Taageer

Gabaygan waxaan Eebbe ugu baryayaa Soomaalida is dilaysay xilligaa. Waxaan ka warbixinayaa murrugmaarrugta aafaysay dalka.

## 6. Ma Xisaabtamaynaa?

Waxaan Soomaalida kula dardaarmayaa in ay xisaabtamaan oo ay caqli adeegsadaan. Waxaan gabayga ku sheegayaa in ay Soomaalidu qaadato masuuliyadda ka saaran dadka iyo dalka. Waxaa kale oo aan qaadaa dhigayaa sida loo diirtay caasimad xeebeedkii ceeb ka saliinka ahayd ee Xamar.

## 7. Datoorkee Innoo Qoray?

Waxaan gabaygan ku waydiinayaa Soomaalida sababta loo taageerayo hoggaamiye kooxeedyo hubaysan oo dhib mooyee aan dheef lahayn. Waxaan gabaygan uga warbixinayaa dhimashada iyo burburka ay dagaal oogayaashu ay dalka iyo dadka badeen.

### 8. Yaan La Dacaroon

Waxaan gabaygan uga warbixinayaa dhibka aan anigu shaqsiyan kala kulmay colaadda. Waxaan misna qirayaa dadka badan ee Soomaaliyeed ee aan waxba galabsan ee dhibka weyni ku dhacay. Waxaan gabayga ku soo gabagabaynayaa in aan isu xilqaanno sidii aan colaadda ku joojin lahayn. Waxaan misna ku dhiirigelinayaa Soomaalida in la doogsan doono.

### 9. Maxaa Loo Dafaayaa?

Waxaan gabaygan ku waydiinayaa Soomaalida sababta loo boobo gargaarka loogu talogalay dhibanayaal Soomaaliyeed. Waxaa kale oo aan su'aalayaa Soomaalida sababta loo beegsado shaqaalaha UNOSOM iyo kuwa kale ee gargaarka kuwaas oo Soomaaliya u yimid in ay wax inna taraan.

### 10. Dooh Dhaha Colaad

Gabaygani waxaa uu Soomaalida ku wacyigelinayaa in la dhowro fayo qabka deegaanka sida ugaarta iyo dhirta. Waxaa kale oo aan ugu baaqayaa Soomaalida in dib loo dhiso dalka. War la qabaa xiiso malahane, waxaan misna Soomaalida xusuusinayaa in ay jiraan kuwo nabadda diiddan. Waxaan kolkaas ku baaqayaa in talaabo cad laga qaado fitna wadayaasha.

## 11. *Maantaana* Daadihinaysa

Daacuun xun ayaa ka dillaacay Soomaaliya sannadkii 1994. Madaxii Waaxdii Saxaafadda UNOSOM ayaa iga dalbaday in aan soo qoro gabay ka digaya xanuunka calool baxa iyo ka hortagiisa. Laba maalin gudahood ayaan ku diyaariyay gabaygan. UNOSOM ayaa kolkaas shaacisay gabaygan. Wargayskii UNOSOM ee maalin laha ahaa ee la oran jiray Maanta dibna loogu bixiyaya Soomaalida Maanta ayaan ku halqabsaday.

## 12. Xorriya

Gabaygan ayaa ah wada hadal humaag (allegory) oo dhex maray aniga iyo Xorriyadda. Waxaan gabaygan ku qaadaa dhigayaa in dagaalka sokeeye ee Soomaaliya uu yahay dhib u yaalla Soomaalida oo ay tahay in ay iyagu xalliyaan. Nuxurka gabayga ayaa ah in dhibka ay Soomaalidu abuureen ay iyagu uun dhammayn karaan.

## 13. Dowladnimo

Kani waa gabay kale oo duco ah oo aan Eebbe ku waydiisanayno in uu inna siiyo dowlad wanaagsan oo danta guud ka hormarisa tan gaarka ah. Gabaygani waxaa kale oo uu ka marag kacayaa in Eebbe marmarka qaar uu ciqaabo kuwa sharta badan isaga oo ku dhibaateeya cuduro, masiibooyin dabiici ah ama dagaallo

## 14. Dadkaygow

Gabaygani waa isku day aan dadkayga Soomaaliyeed kula garramayo sidii colaadda loo demin lahaa. Waxaan xusayaa dhibaatooyinka ay colaaddu dalka ku ridday. Gabaygani wuxuu xusuusinayaa Soomaalida in bulshada caalamku uu dulqaadkeedii sii yaraanayo. Gabayga ayaa xusaya in aan dhammaan ku le’an

karno fitnadan haddii aan la joojin dagaalka.

### 15. Dowlad lagu raayo

Kani waa gabay kale oo duco ah. Gabaygan ayaa xusaya qaar ka mid ah dhibaatooyinka Soomaalidu wajahayso dagaalka sokeeye dartiis. Waxaan Eebbe ka baryayaa in uu arrinta soo farageliyo oo uu ku kaalmeeyo Soomaalida sidii ay dowlad xasilloon ku yeelan lahaayeen.

### 16. Si Xun Socodki Yagi

Waxaan gabaygan ku sharraxayaa dhibka weyn ee soo gaaray dalka wixii ka dambeeyay burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya seddax sano ka hor tirintii gabaygan. Gabaygani wuxuu qirayaa in dhibka dhacay ay Soomaalidu gacmahooda ku keensadeen oo aanuu ahayn mid dibadda nooga yimid.

### 17. Saayirnimada Hooyo

Gabaygan waa kan keliya ee ku jira buuggan ee aan tiriyay 1993. Inta kale waxaan tiriyay 1994-1995. Waxaan gabaygan ku sheegayaa in yar oo ka mid ah wanaagga faraha badan ee ay hooyo ii gashay laga billaabo maalintii aan dhashay. Waxaa hubaal ah in Eebbe i siiyay hooyo aad u wanaagsan.

## 18. Dhiba Deriska!

Waxaan ku sharraxayaa gabaygan sida dagaalku u barakiciyay Soomaali badan iyo sida dilka dadku uu aad ugu faafay dalka oo dhan. Waxaa kale oo aan hoosta ka xarriiqayaa sida loo dhibaateey deris badan dalka oo dhan. Derisku waxaa uu leeyahay xushmad gooni ah xagga dhaqanka Soomaalida. In qof uu dhibaateeyo deriskiisa waxaa loo arkaa fal liita oo doqonimo iyo dembi ah. Saas oo ay tahayna, Soomaali badan ayaa bartilmaameedsatay deriskooda dagaalka oo socda. Waxaan ugu dambayn Eebbe ka baryayaa nabadgelyo.

## 19. Colka Hakiya

Waxaan gabaygan ku cabirayaa jacaylka aan u qabo dadkayga Soomaaliyeed kuwaas oo xilligaas dhexda uga jiray dagaal sokeeye oo ragaadiyay. Waxaan gabaygan ku qaadaa dhigayaa xigmad nabadeedkii lagu garanayay gabyaagii weynaa ee Cabdullaahi Suldaan Maxamed Timacadde (1920 – 1973). Waxaan gabaygan qayb ka mid ah si humaag (allegory) ah ugu cabbirayaa wada hadal inna dhex maray aniga iyo Timacadde oo geeriyooday aniga oo 5 jir ah.

## 20. Kugu Caasin Mayno

Gabaygani wuxuu ka warbixinayaa rejo aan sida badan xilligaa la arki jirin oo ahayd nabad iyo midnimo. Dagaal oogayaal iyo kooxo kale oo dirir isku hayay ayaa u muuqday in ay heshiis run ah gaarayaan. Rejadii nabadda ayaa daaqadda ka baxday markii ay hubka isla dheceen kuwii heshiiska wada gaaray. Waxaan ku qirayaa gabaygan in aan nahay Eebbe dad uu leeyahay oo ay tahay in la joogteeyo cibaadadiisa dhibkasta oo jira.

## 21. Koobkaan Camiray

Degmada Madiina ee Muqdisho ayaan horraantii 1994 ku arkay nin miskiin ah oo dawarsada kaas oo xirnaa dhar calal ah iyo dacas kala laalaada. Ninku waxaa ka muuqatay diif weyn. Islaan shaah iibinaysay ayaa koob uu watay uga buuxisay shaah macaan oo caano leh. Waxay koobkii shaaha ahaa u dhigtay dhulka oo ah halkii uu fadhiyay. Ninkii ayaa isku dayay in uu soo haabto koobkii balse, nasiib darro waa uu liicay koobkii waxaana halkaas ku daatay hadiyaddii qiimaha lahayd oo dhan. Waxaa kolkaas ii muuqatay ninkii oo aad murugo weyni u saaqday. Shaahaas ayaa hayn kari lahaa miskiinka maalintaas oo dhan haddii uu calfan lahaa. Gabaygan ayaan 12 saac gudahood u tiriyay koobkii aniga oo metalaya miskiinkii dhibku gaaray.

## 22. Eebbow

Gabaygan ayaan ugu riyaaqayay nabad kale oo aan mooday xilligaas in ay soo muuqatay. Fitna wadayaashii ayaa mar kale ku hadaaqay in ay heshiinayaan. Gabaygan ayaa qayb duco ka ah aniga oo Eebbe ka baryaya in uu nabad iyo kala dambayn ku soo dabbaalo Soomaaliya.

## 23. Miyaan Caaddil Soo Dirin?

Gabaygan ayaa u dabbaaldegaya waxqabadkii UNOSOM iyo ururadii kale ee samafalka ee nafta ku soo celiyay Soomaalida xilligii uu meesha xun marayay dagaalkii sokeeye. Gabaygu waxaa kale oo uu cambaaraynayaa dagaal oogayaashii habaarnaa iyo kooxii kale oo ka wada faa'iidayay dhibkii ay badeen dadka iyo dalkaba.

## 24. Maan Cayaayiraayo

Gabaygani Soomaalida ayaan ku canaannanayaa kuwaas oo qaniinay gacantii quudinaysay. Dagaal oogayaashii iyo burcaddii kale ayaa dhacayay gargaarkii masaakiinta iyaga oo xitaa dilayay samafalayaashii isugu jiray shisheeye iyo sokeeye.

## 25. Caynaankeenna qabo

Midkani waa gabay kale oo isna duco ah oo aan Eebbe uga baryayo in uu masiibada dalka ka badbaadiyo.

Gabaygu wuxuu ka faalloonayaa qaar ka mid ah dhibaatooyinka ay dadku wajahayaan. Gabaygani waa duco in Eebbe siiyo dadka iyo dalka nabad, sharci iyo kala dambayn.

## 26. Gool

Howlgalkii Qaramada Midoobay (UNOSOM) ee 1993-1995 waxaa uu soo celiyay rejadii Soomaalida qayb ka mid ah. UNOSOM ayaa shaqaalayn jirtay Soomaali badan waxayna qaban jirtay adeegyo kale oo muhiim ah. Gabaygan ayaa u dabbaaldegaya guusha kooban ee UNOSOM iyo ururadii kale ee samafalka ee ka howlgelayay xilligaa Soomaaliya. Gabaygu waxaa kale ee uu dalbanayaa ciqaabidda kooxihii hubaysnaa sida dagaal oogayaashii rafaadka dhaliyay.

## 27. Fahmi Waayay

Gabaygan ayaa ka warbixinaya masiibadii ku dhacday Soomaaliya sanadkii 1991 kadib markii ay burburtay dowladdii dhexe ee dalka. Gabaygu wuxuu xusayaa islahaanshaha Soomaalida iyo in ay lagama maarmaan tahay xakamaynta kuwa fowdada wada.

## 28. Qalad Qalad Lagu Saxay

Waxaan saarkan ku cabbirayaa in aan qalad lagu sixin qalad kale. Waxaan ka digayaa aargoosiga aniga oo iftiiminaya xanuunka ay leedahay qabyaaladdu iyo dhibka ay u gaysatay Soomaalida.

Waxaan Soomaalida kula dardaarmayaa in dhibkii dhacay wax laga barto oo la joojiyo colaadda.

**29. *Maantow* Qoraalkayga Qaad**

Waxaan gabaygan ku hal qabsanayaa wargayskii magaca weynaa ee maalinlaha ahaa ee UNOSOM. Wargayskaas oo Maanta la oran jiray oo dib loogu bixiyay Soomaalida Maanta. Waxaan Maanta ka dalbanayaa in uu ergo ii noqdo oo uu faafiyo dhammbaalka dib u heshiisiinta iyo bogsashada. Gabaygani wuxuu hoosta ka xarriiqayaa qiimaha nabadda iyo aasaaskii Qaramada Midoobay ee ahaa dhiirigelinta nabadda iyo xasilloonida dunida.

**30. Qaddar Eebbe**

Gabaygan ayaa ku saabsan qaddarka Eebbe. Gabayga ayaa ku doodaya in Eebbe og yahay wax walba oo aan mudan doonno; ogaalkaas ayaa ka weyn isku day kasta oo ay dadku la yimaadaan. Gabaygan micnihiisu ma ahan rejo xumo ama in aan xil la isa saarin oo meel la is tubo balse waa in la dadaalo oo la qiro qaddarta Eebbe. Dadku lama imaan karaan nidaam ay ku farageliyaan qaddarta Eebbe.

**31. Midnimo**

Gabaygan ayaa xusuusinaya Soomaalida khasaarihii ka soo gaaray dagaalkii sokeeye.

Waxaan Soomaalida kula talinayaa in ay nabadda doortaan oo ay iska diidaan dagaalka. Gabayga ayaa ka warbixinaya dilkii iyo duqayntii loo gaystay shacabka Soomaaliyeed ee aan waxba galabsan. Gabayga ayaa Soomaalida kula talinaya in ay u midoobaan diididda fowdada.

## 32. Dhadhaminta Mowdka

Gabaygan ayaa ka warbixinaya in geeridu tahay lama huraan si kasta oo loo taxadaro ama la isu dhowro.

Gabaygani ma ahan mid dhiirigelinaya rejo xumo balse waa mid xaqiiqda uun ka hadlaya. Geeridu waxay qayb ka tahay dunida aan ku nool nahay.

## 33. Wax La Yiri

Gabaygani waxaa uu xusayaa qudduusnimda dadka Eebbe iyo kaalinta muhiimka ah oo ay dunida ku leeyihiin. Gabaygu waxaa kale oo uu tilmaamayaa dhibka soo gaaray Soomaalida dagaalka awgiis. Gabaygu waxaa uu qirayaa in nabaddu xal tahay waxaana ku jira gabaygan duco.

## 34. Hurorki Weeyaane

Waxaan tiriyay gabaygan kadib markii la shaaciyay in taliyihii guud ee UNOSOM, Admiral Jonathan T. Howe (dhashay 24 August 1935) uu ka tegayo Soomaaliya oo uuna dalkiisii ku laabanayo. Howe aad ayaa looga jeclaa Soomaaliya. Dowladdii madaxweyne Bill Clinton ayaa Howe u doortay 1993 in uu hoggaamiyo UNOSOM. Waxaa uu xilkaa hayay 09 Maarso 1993

– Febraayo 1994 waxaa uuna uga soo baxay si karti iyo geesinimo leh. Howe waxaa uu bartilmaameedsaday canaasiir ka soo horjeedday rejo usoo celinta Soomaalida. Adhmiraalku wuxuu ahaa geesi aan gabban waxaa uuna difaacay dulmanayaasha nabadda jecel waxaa uuna ka difaacayay burcadda iyo dhiigyacabyada.

Nabaddiidka ayaa ku eedeyay Howe in uu “dhibaatada dalka qayb ka ahaa” taas oo ahayd been cad. Waxaan gabaygan ku xusayaa kaalintii wanaagsanayd ee Howe iyo ciidankiisu ku lahaayeen dadaalkii rejo soo celinta. Waxaan misna xusayaa sida dadaalkaas ay u dhiciseeyeen dagaal oogayaal iyo kuwo ka ganacsada dhibka shacabka Soomaaliyeed ay badeen.

Hasid Naga Dulqaadow

Gabaygan waxaan ku derejaynayaa imaamka (Ugaaska Guud) ee beelaha Hiraab, Imaam Maxamuud Imam Cumar. Imaamka sharafta leh ayaa aad ugudadaalaynabaddasagaashameeyadii bal in uu heshiisiiyo kuwii isku hayay xukunka dalka. Imaamku guulo kooban ayuu ka gaaray (1994-1995) dadaalkii nabadaynta isaga oo hoos u dhigay is nacaybkii iyo kala shakigii kuwii hartamayay. Gabaygan ayaa u dabbaal degaya guusha kooban ee Imaamka

## A

## 1. ISTAQFURULAH

Ilaahow addoonkaagiyoo ooyay baan ahaye

Ilmada iga da'aysaana waa umal i haayaaye

Adduunyadiiba waa aynad kale laga irdhoobaaye

Abaal iyo ninkii loo galaa aamin idilkiisba

Abaar iyo aafadoon damayn anfac ad siisaaba

Inuu adiga eed kaa galaa laga agdhowraaye

Waa adduun intiisii xumeyd waxaan ag joognaaye

Eebbow na sama bixi adaa noo ogaal badane

Afarteeda gees dunidu waa eeba lala yaabo

Hijra waa iflaax iyo iftiin amar Ilaaheeye

Haddii aanad garaneyn meel fayow laba abbaaraayo

Aramida la jiif saw ma ahan ehel rasaaseedka?

Ilaahow adduunkaan beryahan lagu addoomowye

Anshax iyo asluub lama raboo la isku eedeeye

Arxan iyo ixtiraamna waa aalad aan jirine

Awaaraa dhacaayoo dalkaan lagu agoomowye

Aarsiyo waxaa loo dhintaa ani aan noolaado

Aqaladii Islaameedna waa laga adeegtaaye

Ansax waxaan ahaynoo dhan baa nalagu oofshaaye

Ibtilada aabbaheedna waa eeba lagu faano

Istaqfurulah hadii aan la odhan eraya qayreedka

Oo aan Ilaahay la qirin keli ahaantiisa

Arladoo la laabaa dhiciyo aaway ummaddiiye

Iqtiraax san Eebow nasii aana ku illowno

**B**

## 2. BAD YAHAY I MAQAL

Badyahay i maqal waadigaa buluggu waynaadey

Beerkaaga waxa yaal ayaan beden u heenseystay

Kumaan baahi bixin beled iyo beri wixii yiile

Buuraha dhexdaadaan rabaa inaan bariistaaye

Beled waan ka imidoo adaan baalka kaa degaye

Buntuq iyo bas baan uga baxsaday beledki waynaaye

Buraashiyo waxaa aan sitaa buugtaan baranaayay

May baxnaaninaysaa anigu waan basaasnahaye?

Bariiskiyo basbaaskiyo ma qabo beetki la cunaayay

Baroosiniyo waxa aan sitaa jilib ballaar weyne

Bahalaha badeed yaan rabaa inaan bahaystaaye

Boqolaalka dabataa ayaan booy u noqonaaye

Boqornimo la sheegtiyo ma rabo booli la cunaaye

Billad daacadnimo yaan rabaa in aan u baaqaaye

Bililiqada ayaan diidayaa in aan bannaystaaye

Badyahay miyay taasi tahay baabka taladaada?

Ballan ma iga qaadee in aad ii bah noqonaysid?

Ma badbaadineysaa sidii adiga beerkaaga?

Mise waad i baacsani sidii beledki baaseedki?

Oo aad i biijini kolley waan baqaa aniye?

Mise waad i baansanoo i siin aniga baaqayga?

Badyahay bishaarada i sii waan u baahnahaye

Badaw iyo ma'aan ihi anigu bela wax maagtaaye

Waxaan ahay barbaar soo hijroon bela hadday maagto

Bayaankeygu waa kaa hadaad iba badbaadayso

Ilaah yaa badbaadada lihiyo baab wanaag badan

## 3. EEBBOW INNOO BIRMO

Eebbow adaa noo birmada lagu baryaayaaye

Eebbow adaa baajin kara beladan buuflowday

Eebbow ba’ii waa batoo waa balanbal wayne

Eebbow daarihaii billaa waa burubursan yiine

Eebbow boobaa ku fiday beelahoo idile

Eebbow baydkaa lama xurmayn waa la biliqaystay

Eebbow baadiyaynu nahay aan burji lahayne

Eebbow baastiyo biyo qabow waa loo boholyoobay

Eebbow babbaay iyo beet laguma baashaalo

Eebbow baahi baa dadkii uu baqti hawaystay

Eebbow burcadduna dadkay bag iska siiyaane

Eebbow biddey wada noqdeen barafasoortiiye

Eebbow badow buntuq sitaa noo bararafleeya

Eebbow banbanbaa dhaca meeshaan barinaaba

Eebbow balawgaa dhacaa waa beliya hooge

Eebbow bulshadaan barqabo way basbeelayaane

Eebbow buktadan naga dawee oo inana baan

Eebbow innoo birmo haddeer waan bisayl nahaye

Eebbow xeer lagu kala baxo aan baddaba oolin

Eebbow badwayn baan dhex naal beden la'aaneede

Eebbow bahwadaagnimadi waannu u basaasnay

Eebbow bacaad yaa ku fiday dalagya beereedki

Eebbow beeraley diddoo way barakaceene

Eebbow haddaan laga barqaban wuu bi'inayaaye

Eebbow nabad lagu balfoo waala wada booday

Eebbow ballan iyo axdina waa ba an jirine

Eebbow beeldaajiyihi waxaa booski ka istaagay

Eebbow mooryaan buntuq sitoo boob u farameyrtay

Eebbow baqti gowracaan waa lagu basaasay

Eebbow bandiiraddi dad bay beec u tahay maanta

Eebbow banjoogtoo kalaan buura hoyanaaye

Eebbow beniqaate baa beladan noo keeney

Eebbow bilaash bay u dhiman diya boqolaydi

Eebbow bulshadaan barqabo way basbeelayaane

Eebbow innoo birmo haddeer waan bisayl nahaye

## 4. AAN BUTAACSHO

Baryahaanba waanigaan birbirin baabka gabayeede
Aan butaacsho baalaha u furo waxay bislaynaaya
Booboobi maayee balaan boorka ka ilaalsho
Soomaaliyey beryahan waanigii baaba'oo basaye
Boor iyo waanigii dhex gallay boholo waawayne
Baroortayda waadigii ka baqay   baacug oo kale e
Baaruudda oloshiyo bamkiyo baazuukiyo beebe
Bedinkayga may taabanoo layna baal mariye
Beerkiyo wadnaha yay haddana bari ku taalaaye
Aan idiin bidhaanshee bal maqal baabka aan furayo
Baashaalki daayoo beryahan baylah baan ahaye
Soomaalidan is baabi'inaysaa beerki iga qaadday
Baabkii an furannaa runtii beladan noo keeney
Barad weeye oo odayadeen baaqna laga waaye
Bisin beena iyo baaddil bay beerka ku hayaane
Beladaan miyaanay iyagu baajin karahaynin?
Maantana banaankaa sarey ba'a ka joogaane
Basanbaaska baasiyo beladan baaba'aan dhacaya

Dhalinyaradi uunbay ba'aas beerka uga tuuri

Beerlaxawsigaasay iyana boobaha la boodi

Beentaase waxay baran markay bowdo kala booddo

Ama bedinna hoosiyo boggaba baynaad kala gooyso

Ee baanba daayee beryaba bowka laga qaadin

T

## 5. NA TAAGEER

Ilaahow na taageer beryahan taa'ib baan nahaye

Taah baan la tiicney sidii towsku noo helaye

Tacluus baa na taabtoo ka tagnay taagni iyo jiife

Ma tiraabno sidii ay colaad taajka inna saartay

Anaguna tabcaan baan nahoo waan tukubi haatan

Tusbax go'ay sidiisaa taladu noola too tahaye

Tira koob ku tirinnoo timuhu toban ma dhaafaane

Tiraabkina ma karaynoo tilmaan taabashaan nahaye

Tuug iyo sidaan nahay taroox nala taguumbeeye

Sidii tiix da'aayoo kalaan tiilna noo harine

Waxaan tebaynaana waa gacal na taageera

Aan wada tigaadnee Allow talada noo toosi

Hana na tumaatine Rabbow noo tacaal weri

Tafaraaruqana naga najee waa tilmaan cudure

Aan wada tiraabnee Allow talada noo toosi

Tuhunkana innaga tuur Allow tacab qasaar weeye

Nabad lagu taraashaa nafluhu tabar ku yeeshaaye

Waa talfiiq colaaduna malahan taya lasheegaaye

Bal tartiiba Soomaaliyay tawal baa yimide

Ha taxriifin qayrkii Ilaah tirada noo siiyay

X

## 6. MA XISAABTAMAYNAA?

Ummad yahay xalaybaa xiskiyo xaaddu i xanuuntay

Oon ku xiiqay xaajada middaan xoor ka filanaayaa

Oon xoodis dheer galey anoo xanaf u diidaaya

Xasad iyo xumaan baa ka dhacay Xamarti wayneede

Xamar Wayne Xoosh iyo dhammaan xeebahoo idilna

Xaaluf yay ka qaadeen wixii laguba xooraayay

Xasil iyo haddii aanan helin xaaja noo bilanta

Xafaaraha haraayaaba noqon xaaba oloshaaye

Xaaxida badeed yaa ka badan xiisad noo dhimane

Xal maxaad ka haysaan haddoo xeero kala taallo?

Ma xisaabtamaynaa si uun xal loo wada gaaro?

Mise xan iyo waxaad weli waddiin xaala yiri beena?

Mise xaalad kale yaad xusee nabad ku xaalayno?

Mise waa uun xayraami ood xagalahays goyni?

Xakamaha idinkow haya kolley tii ad xulanayso

Xilna wayska saaray sidaad ceeb uga xoroobi

Ee xaabso ama xoor xornimo idin xisaabtiina

Anse xaraf su'aaleed balaan xuubka ka caddeeyo

Xigmaddiyo xiskeenii miyaa xuurka bari qaaday?

Mise xoolahaan la midnahoon xera wadaagnaaba?

Xabadaha xagee loo sitaa xiinkan dami waayay?

Ma xasisho xaajada middii xiiqid laga dhowro

Mana ahan xikaayee warkaan geli xusuustiina

D

## 7. DATOORKEE INNOO QORAY?

Dadkaygow su'aal diirran baan diirka ka caddayne

Daa'im baa na daawanahayee daacad ii dhagaysta

Qabqablayaal dagaal iyo maxaan damac u taageeri
Wax duminta ayaa looba dhalay ooy ku doogsaniye
Dugsi qura hanoqotee maxay dayna nagu sheegan?
Dawo miyay u haayaan dadkaan hoobiyuhu diirtey?
Dulli iyo waxay nagu faleen darab nijaaseedku
Daa'im baa na caynshaye miyaan diirnax ka dareennay?
Dabkay nagu shideen waa waxaa diiftu nagu taale
Datoorkee innoo qoray inaan daacad u ahaanno?
Dadkii noo gurmaday bay ku oran hadala deelqaafa
Nabadiyo degnaan iyo daryeel waa la diriraane
Waa yeey dabool loo gelshoo dayrka noo timide
Dad cun weeye aan doona hayn dowladnimo raagta
Dab urursi daran bay wadaan dowyadaan dambe e
Dagaaladii sokeeyay rabaan dib u billow goode
Da' yar iyo duqow iyo waxay diracya laayeenna
Waa dembiilayaal aan lumayn labada daaroode
Ka durduurte dhiigeeni oo dabar na saareene
Datoorkee innoo qoray inaan daacad u ahaano?

## 8. YAAN LA DACAROON

Diinlayda gabay dadbaa deeqsi ku ahaaye

Iyagaa daadahayn jiray markay daahir noqotaay

Deelqaafku waa ceebe iyagaa Daa'im ka duwaaye

Deelkii ay tiriyaan marnaba dereja waayayne

Idin deeqsiiyay hadalkee bal maqal aniga doodayda

Dabar baygu xiranoo beryahan dayrshay socodkiiye

Ma daandaansho dumarkana siday dooxatow timide

Ma daneeyo dhuuniga hadduu deeqna uu yahay

Wax i daaray moojiye anigu daalay dowyadane

Dalkanaga ayaan diirnixiis gebi dareemaaye

Dakanaan damaynaa jirtiyo doonis derejeeda

Waan ku daalay sidii aan lahaa Daa'imow magane

Waa dab aan innagu doonanoon daalib u ahayne

Innaguna shidaal yaan dabkaas dalaq ku sii siinnay

Xamar dacaladiisiyo dhulkii diririm baa yeeri

Nin damiir leh yaan doonahayn inuu dabkaan eegto

Danta lagama maarmee muxuu duul yahow fali?

Wixii deelka kuu galay ayaan darafna kaa aadin

Daar dheer hadii aad gashood dam isku siisaana

Waa lagu dul keeni wixii deelka kuu galaye

Doqonimase waa inaad duliga diirnax kaba muujin

Inkastoo dadkeenii qaxeen qaarna dabar beelay

Inkastoo daciif aanu nahay diifna nagu taallo

Daallinnimada aan dayno oon Daa'im ka cabsoono

Aan daawa dhiganoon dagaal deli ka tuuryeyno

Oo yaan la dacaroon dadow doogu wuu imane

## 9. MAXAA LOO DAFAAYAA?

Soomaaliyay dugaag maynu nahay dereja laawooyin?

Mise damiin ayaan wada nahoon doocna garanaynin?

Mise duul la falay baan nahoo diirnax laga dhowray?

Mise waali aan dawo lahayn yaaba nagu duugan?

Mise dadaw an yaabaye wax baa naga damuumsiini?

Mise dunuub an horuu kaydsanaa nalagu soo daayay?

Mise daar agoomeed ayaan duminay dayrkeeda?

Mise dalakan yaanaba lahayn laysku wada dooxay?

Dadka noo gargaari maxaan duulaan ugu qaadi?

Maxaa loo dafaayaa daryeel dunidu soo dhiibtay?

Mise daacadii baa luntoo dulmi ku eedaamay?

Mise dunida yaa aakhiroo dawankii baa yeeray?

Mise waa dulaaliin kuwaan derajadow yeelnay?

Mise duqow ayaanaba lahayn Daa'im ka cabsoota?

Mise dagaaladaynuba malayn inaan ku doogsayno?

Mise waa dayuusnimo waxaan isu duqaynaaba?

Mise dadka ayaa fara batoo qaar la dabar goyni?

Mise aniga uun baa damqane diiftu sharaf weeye?

Dadka noo gargaari maxaan duulaan ugu qaadi?

Maxaa loo dafaayaa daryeel dunidu soo dhiibtay?

## 10. DOOH DHAHA COLAAD

Dad yahow dalkeenii burburay aan dib u habayno

Aan daryeello duunyadiisa iyo wixii dul joogoo dhan

Dakaniyo an dayno wixii dirirba noo keeni

Aan danteena garanoon qodaal daacad u ahaano

Danni iyo intaan dayno damac daallin daba joogis

Dowladnimo an doonnoo faceen darajo dheeraano

Wixii daar burburay iyo wixii dalakan naafoobay

Oo aan dahsoonayn siddii dayr an di'in waaga

Oo sidii dayax dibada yaal daahna laga dhowray

Diif iyo diihaal wixii dacar la qooshaayay

Daqaradii na gaaraa indhuhu nala dikaamaane

Dooh dhaha colaad male wanaag laga dul dhowraaye

Dadka qaar ayaan walaalayaal nabadi deeqeyne

Duuflaaliintu wa doqon waqood duminta uun dooni

Dawa ma leh illaa laga tashado dibadda loo tuuro

Dad wada dhashaan nahay sidii deera ubadkeede

Dalkanaguna waa hale maxaa delidhac noo keeni

Waa iga dardaarane dadow Daa'im ka cabsooda

Dooxatiyo tuugana dhammaan dabin u qoolaaba

Markay dalaq yirahdaan sharciga duhur cad soo taaga

Markaasay durruus baran haddaan muran la doonayne

## 11. MAANTAANA DAADIHINAYSA

Dadkaygow daf baan ahay haddaad waana iga dooni

Anaa idinba deeqsiin intaan deelka ku hayaaye

I dhageysta waa deeq ninkuu Daa'im garan siiyo

Xaalad caafimaadoo degdega yaa dig soo tiriye

Ururka Caafimaadkee Dunida yaa digniin bixine

Maantaanaa daadihinaysee maqal dubaaqeeda

Daacuunaa dilaacaa la yiri dalakan keennaahe

Da’ kastow ahaatana dadkuu dabar jaraayaahe

Intaad dawoy ad dhihi layd markuu daqar ku gaadhsiiyo

Intuu weli ku dilin oo ad tahay dowlad soconaysa

Datoorada warkoodiyo bal maqal doodday dhigayaanna

Dawayn iyo dabiib waxaa ka roon adoo digtoonaada

Dhega uma daloolaan qofkuu malag dilaayaahe

Adigoo duruus u dhiga hayuu kaa durduriyaahe

Waa hadal da’ waynee bal maqla waad ku diirsaniye

Isdilkiyo daacuunkaan haddaan diirad wada saarno

Dagaalkaaba roonaan naqaa yaan dembi ahayne

Bal daneeya waanadan tanoo daacad u ahaada

Saxaradoo dad iyo duunyaba layska wada duugo

Degdeg howga dejin raashinkoo weli dab doonaaya

Darxumiyo intaad diifna arag diiri biyahaaga

Gacmuhuna daryeel bay rabaan Daa’im abidkoode

Darab qaadka dabadii markaad daahir noqonayso

Saabbuun doono haddaad heli karee amaba deebayso

Dulya hoos ka mayr gacmahoo meelna haka daynin

Ka durugoo duggaafadda ha dhigin adiga dayrkaaga

Dab ku qabo haddii aanay ahayn duugid la ogow bal

## 12. XORRIYA

Dadyahow daf baan ahay haddaad waana iga dooni

Inkastoo an daalanahayoo diifi igu taall

Darma lagu ladiyo dooni maa daarad layr badane

Anaa idinba deeqsiin intaan deelka ku hayaaye

I dhegaysta waa deeq ninkuu Daa'im garansiiyo

Anoo daartayada uun hurdaa dawan la yeersiiyay

U dareeray anigoonba garan duulka uu yahaye

Daymooshadii hore ayaan daaqadda abbaaray

Mise waa xoriyaddii dalkaan Daa'im ugu deeqay

Duduubtii horeba soo gal baan daacad ugu sheegay

Iyana soo daf tiri oo ku degtay derinti aan jiifay

Waxay tiri xornimadii dorraad dibadda loo tuuray

Oo la dayrshay baan ahay haddana daawashow timide

Waxaan iri adiga dabadaa daayac soo degaye

Dalkan iyo dadkiisiba dab baa daafihii jaraye

Derejayn qabiil baa dadkii daayacaa badaye

Xamar waa dal uun maran sidii lama degaankiiye

Dulli baa Hargeysa diirsadoo daalib u ahaaye

Kursi loo dagaalamo ayaa dab iyo hoog keenay

Derejaan durduuraniyo doog dayax la moodaana

Adiga dabadaa maanan arag Daa'im maragtiiye

Waxay tiri dhulkaan deeqsiyoow dooriyaa helaye

Dembigii dhacaayana Daa'im baa iba dareensiiyay

Ee adiga daacaddaa maxaad deelka ka higaadin?

Waxaan iri ku daa Daa'imkeen dawgan dabadiiye

Dhiiggan daadanaaya ayuu Daa'im ka carooda

Dooddaada waan ku diirsadaye haygu dabar goynin

Waxay tiri duduub guud i sii daalay idilkeeye

Waxaan iri doog yaa ka baxay dalakan qaarkiise

Waxaan iri dulqaad iyo heshiis loo diyaar yahaye

Waxay tiri madaalow adaa Daa'im ka cabsoone

Dadkaygii dardaaran iiga gee deeq kaloo badanna

Inay jahliga dabarkiis jaraan taana ugu diiri

In dalkoodan aysan dayicin taana ugu diiri

Waddaniyaddu inay daawa tahay taana ugu diiri

Wax dumintu iney aafo tahay taana ugu diiri

Inaan daawashada soo kordhiyi taana ugu diiri

Darajiyo wanaag inaan ladeyn taana ugu diiri

Dastuurkeenu inuu yahay jacayl taana ugu diiri

Dulqaadkuna inuu derejo yahay taana ugu diiri

## 13. DOWLADNIMO

Ilaahow adaa daa'imoo dereja waayayne

Adigaa dunida uumay iyo dadka dul joogoo dhan

Marka dulunku faafo nafluhu daacadda illaawo

Oo dulmigu uu farabatoo dunuubtu ay faafto

Duulkaa dulloobay adaa xaqa dareensiiya

Oo hadday digniintaada iyo maqalna dooddaada

Adigaa dabayl iyo biyiyo daacuun dabbaalsiiya

Maantana dalkan waxaa ku degay oona dabargooyay

Dagaallo iyo duufaanno iyo weliba daacuune

Xaq la dafiro oo la daba maraa waa duf iyo hoog

Damacana waxaa lagu yaqaan doqonya haybteede

Afya diin dad aan kala duwnayn dul iyo muuqaalna

Oo col isu dumaayo is dili isna dawaynaynin

Oo diihaal dadkoodii u go'ay saama dubanaayo

Waa damiir midkii ugu xumaa doorsan iyo yaabe

Ilaahow diiftaan naga dawee oo nawada daafac

Oo daa'irada ina dul taal daaqada ka tuur

Ilaahow dowlad caaddiloo shacabku dooraayo

Oo dib u dhis iyo qayr waddoo laguna doogsaayo

Danta guud middii door bidee Daa'im hannoo waayin

## 14. DADKAYGOW

Dadkaygow heshiiyoo dalkaan daacad u ahaad

Dagaal laguma gaaro dadnimo doqonse waa mooge

Haddii dowladnima lagu helaa diririm duulaana

Afarsano miyaanaan dab arag dooxatiyo tuugo?

Daacuun miyaan nalagu ridin diiratiyo gaajo?

Markii dunidi noosoo diddoo nala dawayn maagay

Oo deeq wixii ay sideen nala durduursiiyay

Daadufkiina uu naga ba'oon doobbi culanayno

Kuwii Daa'im noo soo diroo diifta naga mayray

Dabarkana intay naga jareen nana dabiibaayay

Miyaanaan dagaal laga horgayn ducaqabowgii?

Ma dadnima la sheegaa innaga Daa'im naga qaaday

Waxaan diintu qabinoo damiir nin lihi diidaayo

Ayaan Daa’im weligeen qabnaa inaan ku doogsayno

Dagaalkaan miyaanu lahayn daawa laga gaaro?

Dowddarnimo an diidnee dadow damiya duullaanka

Dowlad xuma waxaa nooga daran doodaan damahayne

Maamul uun dalkaan aan u hello dirirtu aafaysay

Dadkeeniyo dalkeenaa ka bixi dulunka dayn waayay

Dunidii dulqaadkeed lunyee yaan la dabarbeelin

Dagaal sal ballaaran warhooy yaan naloo dumin

## 15. DOWLAD LAGU RAAYO

Daa’imow dadkii daalyay oo dawdaf noqoy cayra

Daa’imow dalkii waa burburay daarna haba sheegin

Daa’imow dugaag la ma arkoo waa la dabar gooyay

Daa’imow dhirtii waa la jaray oo la dibad geeyay

Daa’imow baddii waxaa daldalan duulaan garanaynin

Daa’imow dastuur nama hagiyo daacad lagu tooso

Daa’imow dagaal lama rabee waa la damin waayay

Daa’imow duullaan waa la nacay lagana deeqtoonye

Daa’imow deris kala durgoo waysu dudi haatan

Daa’imow dugsiya lama tagoo laysu dacareeye

Daa’imow dalkaan waxaw taliya dooxatiyo daabley

Daa’imow adaan dawa u weyn cudurki daalshaahe

Daa’imow dabiib waxaa dalkaan dawyadaan dilay

Daa’imow darxuma waa fiddoo beelna maba daayin

Daa’imow na daaddihi adaa dulli ka diiraahe

Daa’imow dabaadiga qaboo yaanay dabar beelin

Daa’imow dulqaad iyo dabcina daaqad laga tuurye

Daa’imow dadnima noogu deeq aad damrada tuurree

Daa’imow darbaa nagu dhacdiyo daqara waawayne

Daa’imow dawdarro waa nacnee dowlad lagu raayo

**S**

## 16. SI XUN SOCODKAYAGI

Saddex saniyo dheeraad miyaan saatan ku negaanay?

Si xun iyo saalbooyin maa Saadiq noo qorayna?

Sikaawaha maxaa nagu saladay saakadii weliba?

Saqiir iyo ma noola safkii saafiga ahaaye

Sutidaa waaxaa looba suray sowjar diin necebe

Samadoonadii baa ka siqey sababti loo doortay

Si xun socodkayagi waa waxaan saatan noo galaye
Sebi iyo haddii aan sinaba soortiis laga weecan
Oo la iska saarsado waxaad senti ku soo iibsan
Ciddii saa u eegtana naftaa laga sarraysiiyo
Subaxdii an toosnaba haddaan Saadirow orano
Sacbaha haddii aan sariyo sayrinaa abidna
Soo iibi zuugana haddaan sahal u yeeleyno
Sidee baan ku heli ducadayada waa su'aal culuse?
Seeftiyo saw daasaan sinnaba suurad wacan keenin
Sentiyaal la quutaa kolay saatan noo galaye
Saciiray sugaayaan kuwii silica noo laayay

## 17. SAAYIRNIMADA HOOYO

Sebenedanba waanigii sahwiyay siinna tirin waayay
Oon ka soomay maansada middaan saafi ku ahaaye
Sadar iyo haddaan doono inaan saafi wax u sheego
Saakiyo ma'aan sugo anigu saadambiyo saakuun
Saayirnimada hooyaan rabaa inaan sifeeyaaye
Sabirkeeda yaan doonayaa inaan sarbeebaaye
Samaheeda yaan doonayaa inaan samaan sheego

Siiba sida aniga hooyaday saacid ii tahaye

Seddax tobana maanta oon sigiyo sebinimaantaydi

Socod barashadaydii illaa saan la orodkaygi

Sentiyaal aan leeyahay anoon siisma karahaynin

Saadiqow ayay igu tiriyo saamac badanoowe

Anoon sanado dheeraysanoo sebi sidiisiiya

Ayuu abbahaygii salkacay safarna dheer aaday

Siraad mariddii mooyee malahan soo noqosho toona

Toban sano ayuu mootan yahay saakadan an joogno

Saxariirna weli maanan arag silic dhammantiise

Sabiib iyo waxaa lay solaa subag la iidaamay

Salaantana waxaa la'i yiraa Saadir ha ku daayo

Sadiiqow Ilaahow adaa saamigaa garane

Sareeriyo samaan sii hooyaday sidii ay doontaba

Saciirana ka dhowr Saadirow waa samaan badane

# DH

## 18. DHIBA DERISKA!

Dha'da gabay beryahan waa nigii dhaafay hadalkeede

Dhabiil igama ahan dheexaan dhamasna gaadhsiiyay
I dhegaysta aan idin dhahee dhawda hadalkayga
Dhulka naga dhibaatiyo ka weyn waxa dhexdiis yaale
Dhimbilihii dhacaayaa ka dhigay dhoof wax laga aaday
Dhimashaduna waa waxaan dhegiyo dhaaya soo marine
Dhabba yaal ayaa laga dhex dhigay dhisma wixii yiile
Dharaartii ayaa nala dhacaa dhaayahoo furane

## C

### 19. COLKA HAKIYA

Soomaalidaan caalamka u jeclaa caddaan iyo madowba
Cafis hadday ku helayaan ku waan cadaab u geli laayba
Caysh iyo kuwaan dhaafsadeen caalamkoo idilba
Caynadooda kuwaan ugu jeclaa Caaddil intuu uumay
Canaad badan kuwii aan u galay si aan u caawiyo
Ciil badan kuwii igu riday markay colloobeenna
Caqligiini ma waxaa la tegay caada cunayaasha?
Cindigiini ma wuxuu ku dhacay ceelaan cidi gaarin?
Cayri cayma ma diiddaa la yiri waana cayn sugane
Cisadeeni inkastooy luntoo nalagu cowr yaynin

Colka hakiya cadawgiin jabyee waaba ceeb sidani

Cabdullaahi Suldaan Timacaddaa caynka ka higaadshay

Wuxuu yiri col gurigaan hakiya waa cara Ilaahe

Wuxuu yiri curaddaa ku lumi carcarta haateere

Wuxuu yiri culays yaa ka iman ceebaan harahayne

Wuxuu yiri cuqdaa kala dhex geli kulli caruurteenn

Wuxuu yiri caabuq yaa ka dhalan caaradhuubyada e

Wuxuu yiri cudud yaa ku lumi ciidan faraweyne

Wuxuu yiri cood yaa ku le'an cosobna wuu suuli

Wuxuu yiri ceelashaa la dumin waa cajab Ilaahe

Wuxuu yiri carshaantaa la gubi waa cibaara weyne

Wuxuu yiri culimadaa la dili waa cilmi la'aane

Wuxuu yiri cadradahaa la kufsan caallenimo weeye

Wuxuu yiri ciiddeena yaa degaa haddaan cirib beelno

Wuxuu yiri ciroolaan ehee yaan la i ciyaalsaan

Wuxuu yiri codkaygaa haddaan ciidda laga qaadin

Wuxuu yiri haddaan laga caagin curadda layntaanba

Wuxuu yiri codsigaygan haddaan cidi iga yeelin

Wuxuu yiri colaaddaan haddaan caawaba la joojin

Wuxuu yiri cirkaa soo dumiye yaanba la is caasin

Caamanimo intaaan dayno hooy casharkan maan yeello

Caano haddii laga maalayoo calafna ay keeni

Colaad sokeeye imisaan wadnay waa su'aal culuse?

Imisaa cuuryaantayoo cago aan lahaynin?

Oday cad ah imisaa la dilay cunug an waynaanin?

Imisaa ciiddaa lagu rogay caalim iyo sheekhba?

Imisaa la kala cayriyay qoys dhan oo camiran?

War hooy ubadka noo caynsha oo yaanba lays cilaaqin?

Anigana calool xumay dishee ciilka iga daaya

Cod gabay hadaad garanaysaan caarif ku tihiinna

Waan idiin caddeeyay intaan cindigay ku hayay

Cimrigiin jirow i caawiyoo joojiya colaadda

Caashaq waxaan u ahoon doonayaa nabad caan baxda e

Cawa iyo ayaankeen lunyee calaf gobaadkeenni

Cadawgeeni waa ka tashtoo ciidan soo diraye

Ciiddeeni qayb buu la tegay cadceeddoo soo jeedda

Cidi kama hor teginoo ma nihin dowlad calan lehe

Cafi caam ah haddii aan la helin carradda Soomaali

Ciyoontaanba haddii aan la demin ciiradiyo qiiqa

Caasimadduu runtii noogu iman Caaddil maragtiiye

Is ciil kaambi waxaa nooga roon codkaygoo la yeelo

Haddii aanse lay cisayninoo ciyaar laygu dhaafo

Anigooba caalima haddii caaqle la i moodo

Culayskayga haddii aan la garan caynaan samidayda

Kul unbuu Caaddil caad ka rogi casharadaydaane

Kolkaas baa cod qura laygu oran caaqil baad ahayde

Cishadaa inta la gaarayana caalle an ahaado

## 20. KUGU CAASIN MAYNO

Caaddilow nabadii caad ka kacyay waa cawa adduune

Nabad baa la carrabaabaya ciilna la ilowye

Colaaddii la iska daayay iyo caara dhuubyadiye

Kugu caasin mayno innagu kuu cabdaan nahaye

Caalamkiina waa kaa tegoo caadda sii maraye

Cawana umaan helin wax uun cawda kor u dhaafsan

Cindigeenna maan gelin inaan caajis ka ahaano

Kugu caasin mayno innagu kuu cabdaan nahaye

Ciiltirow adaan weligaa ciniqna moogayne

Duul cataabayaan nahay haddana cidi gargaarayne

Waan u ciil qabnaa duulashii ceebtan nala maagay

Kugu caasin mayno innagu kuu cabdaan nahaye

Cilmigeena haddaad qaaddo ood caama naga yeesho

Cuuryaan haddaad naga dhigtood cawana noo yeelin

Ama caydhi waa ba'an tahee nagu calaamayso

Kugu caasin mayno innagu kuu cabdaan nahaye

## 21. KOOBKAAN CAMIRAY

Calaf iyo wixii aan cawaba Caaddil kuu gelinin

Inkastood catowdaa amaad cidaha tuugtaaba

Carar iyo cinaad laguma helo waana cayn sugane

Koobkaan camiray een cabbays shaaha ugu miisay

Cabitaanba daayee anoon carrabka gaadhsiinin

Ciiddaa haduu iga calmaday waa cawa adduune

Caada uma an lihi inaan cara la ooyaaye

Caaqnimada koobkan rabaa inaan caddeeyaaye

Cadceeddoo dushaydaa la dhigay caadna laga daayay

Carra dheer wixii aan maroon cagaha jiidaaaba

Cid kastoon u tegay tay i tidhi calaf la'aan laabo

Caku, waxaan iraahdoon haddana sii cadceed maraba

Calafkii yaraa een ka helay ciidda dabadiisa

Hadaad ciidda iga siisay waan kuu caraysnahaye

Caaqnimada maxaa kuugu wacan waa cajab Ilaahe?

Ma calaf ciriirigaa galaa lagu ciyaaraaba?

Carradaa hadduu kaba batoo caadka sare dhaafo

Cisayn iyo wuxuu naga mudnaan ceeba ka ilaalin

Adiguna ciyaar baad malayn calaf adduuneedka

Cindigaaga maad galin inaan ciniq la haayeenba

Haddaan ciid shisheeyiyo la tegin caalamkoo idilba

Cabbur iyo haddii aan la marin madhin cidhiidhyoonba

Cayr iyo waxaan geli lahayn caabuq idilkiiba

Caaqnimada maxaa kuugu wacan Caaddil magantiiye

Inkastoonba cayntoon weliba caano iga daadin

Ilaah yaa i caynshee adigu waa cidloo kala e

Calaf aanba leeyahay runtii dib uma ciidaysid

Cabbaar baan caddays ciil la’aan caadda kaa dhigaye

Waan kaa calool duubtay ani caawa dabadeede

Cidlaan kaaga tegay ee ogow kuma cisayn doono

## 22. EEBBOW

Nabadaa cartamaysee Allow adigu noo coodi

Allow waan calmanaye nidaam caaddiloon bi'in

Allow caada xumadii mar kale ha nagu ceebaynin

Waan caga gubyoonaye Allow adigu noo ciidmi

Allow curada laynti mar kale ha nagu caadaynin

Calwisiyo dhibaatiyo wixii daal na caga gooyay

Allow noo carootaye adaan cafis ku waydiinnay

Adaan kuu calaacali Rabbow caaddil baad tahaye

Allow cudur ayaa nagu fidoon ka cabanaynaaye

Calool baxa Allow naga najee caalim baad tahaye

Calool sami Allow nagu nagee waa cawa adduune

Allow cisi iyo sharaf nagu nagee caabuq baa yimide

Allow naga najee waa Canjeel caadna lama saarin

Waa belaaya cawlane Allow dirir ha noo celinin

Carcartiisa daynoo Allow caajis baan nahaye

Caaddilow caalaynu nahay aan cindi badnayne

Caaddilow cayuun laga tagyiyo ciid sanoo idile

Xoola kama ciyaayaan dhulkii caadda hayn jiriye

Caasimaddaanu soo buuxinoo laysku curjiyaaye

Allow caqliyo caqiidana na sii ciil tiraa tahaye

## 23. MIYAAN CAADDIL SOO DIRIN?

Dadkaygaan cuddoonoo la baday caabuq iyo gaajo
Colaadiyo kuwii lagu saladay caara dhuubyada
Cawa iyo ayaaniyo kuwii calafna loo diiday
Cabashadiini caalamkaa maqloo ciidan soo diraye
Waa kaa dhulkii la camiroo ceebti laga mayray
Ceelaal iyo waa taa la furay goobo cudur bare
Carra rogida beeraha wataa cagaftu meerayso
Cir ku hoore keliyadii bacaad caadda hayn jiraye
Caalamkii na caawiyay dadow innagoo ciirayna
Caasinimo ma fiicnee miyaaan Caaddil soo dirin?
Cirifyada dhulkeenaa dadbaa caata weli liita
Cuud kastoona loo diro dhul jiif caaq ahbaa jira e
Waa cadow aan doonayn in aan ciidda ku negaano
Cirooliyo ciyaalkeen haddaan ciladahaa dayno
Cimri gaabi inaan laga baxayn caarif ku ahaada
Qaramada Midoobiyo ciddii ciilka naga saartay
Caruurteena nimankii baxshee curadadii caynshay
Caku nimanka caynaaya waa caada cunayaale

Caalamkii na caawiyay dadow innagoo ciirayna
Caasinima ma fiicnee miyaan caadil soo dirin?

## 24. MAAN CAYAAYIRAAYO

Caqli daranta Soomaaliyey Caaddil garan wayday
Ceeriin cunkiinii batiyo cawra sharaf moode
Cir birqaaya noqotaye haddaan ceebna qari maago
Maan cayaayiraayee war baan caadda ka caddayne
Ma cabbiri karaayo halkaan caallanima gaarray
Caabuq yaase noo soo hoydiyo cilada liitoo dhan
Caayib bayna haystiyo cadanyo caalna helahayne
Waa naloo caroodaye bal yaan cafisna waydiisan?
Wax kastase aan calalshee waxaan ii cuntamahaynin
Dadkii caawimada nooga yimid ciidda dabadeeda
Ee caysh waxay heli kareen calalna soo reebin
Inaan ciiska aan lagala baqan caara dhuubyada e
Caga bararnayeey ee maxaan caawa fali heedhe?
Cisa iyo sharaf lama hayo cantatab mooyaane
Caasi miiran baan wada nihiyo caama ubadkeede
Caloolxumida waxaa iigu wacan iyo caloolyawga

Cakudana an leeyahay siduu camar i quudaayo

Waa carsaanyanimada dadkaan caaqilada moodnay

Carwireeyda mooye hadday camalsan muujaynin

Ciddijiid hadday kaba yihiin kuwaanu ciirsaynay

Caaddil maa innagu xiray inaan daba cayuugnaano

Wax kastase aan calalshee waxaan ii cuntamahaynin

Dadkii caawimada nooga yimid ciidda dabadeeda

Ee caysh waxay heli kareen calalna soo reebin

Inaan ciiska aan lagala baqan caara dhuubyada e

Caga bararnayeey ee maxaan caawa fali heedhe?

## 25. CAYNAANKEENNA QABO

Caaddilow caynaankeenna qabo caymiyaa tahaye

Caaddilow calcalaheenibaa ciilna baday caawa

Caaddilow cawiyo layl adaan kuu ciyanaynaaye

Caaddilow colaad baa dadkii caata go'ayaaye

Caaddilow cooflow qori sitaa noo caga jugleeya

Caaddilow cabsaa nagu fidday cunugya waayeele

Caaddilow waxaa laysu cuni cadaw sidiisiiye

Caaddilow calwiskaan dhacaan ka cabanaynaaye

Caaddilow caruur wada dhashoo caan ahaa nahaye

Caaddilow na caawi adaa caarif ku ah qaybe

Caaddilow cuqdaa kala dhex timi culimadeeniiye

Caaddilow cibaaraa dhacdee cidaha noo caymi

Caaddillow colgurigaan adaan kaa cuskanaynaaye

Caaddillow curaar baynu nahay ciidan an lahayne

Caaddillow waxaa nagu cubtami oo na kala cayrshay

Caaddillow caalayaal kursi u cartamayaahe

Caaddillow intii ay dileen amaba cuuryaantay

Caaddillow ciiddaa waa ka badan waana cayn sugane

Caaddillow caruur wada dhashoo caan ahaa nahaye

Caaddillow na caawi adaa caarif ku ah qaybe

G

## 26. GOOL

Dadkii gaajadii dilatayoo gibil madoobaaday

Dadkii gacanta hoorsanahayoo giirkii laga boobay

Gardarada dadkii lagu galee gobol la naafeeyay

Gesiin ay cunaan iyo kuwii genina loo diiday

Gabanadooda ummaddii dorraad gowda laga saaray
Girligaanka kuwii lagu ganee gudubna loo laayay
Asaylay ilmada gabax ka siin goor iyo ayaanna
Guuxa aan damaynina kuwuu gama'aanu diiday
Waxa gubaya waa dadkay tolow gacalka moodeene
Danahooda haddii ay garteen guulna hamiyeena
Gantaaladii hadday wada dhigeen waa galad Ilaahe
Waa gool Alley lehe haddaan libin ku geeraari
Goboladii la kala gooyayoo laysku gala haynin
Gumiciyo rasaastii wixii layku wada guulay
Ninkii geda yaraan lagu tebaa wixii la gooyaaba
Guhaad iyo colaadiyo wixii gaaray geyigeena
Go'ayeey agoomuhu waxay gocasho reemaanba
Gardaradii dhammaatoo xaqaan cidina gaarayne
Booliskii gawaariyo hubbaa gacanta loo saaray
Maxkamadihii garsoorkana wax bay kala guraayaane
Nin waliba wixii uu galaa laga gudaayaahe
Runtii goosan nabad diidayaan gaagna ka harayne
Gorodana haddii lagu dhegoo gowrac lagu jiido
Waa gool Alleylehe haddaan libin ku geeraari

## F

## 27. FAHMI WAAYAY

Soomaaliyey hadal fayow aan ku fahamsiiyo

Faan igama ahan faaladani wayga filan waaye

Fajac baan ka qaadoo indhuhu way fataatiire

Fahmi waayay waxa aan dhammaan isu ficlaynaaye

Farqura ayaan nahay haddaan fidna la doonayne

Faddarada waxaa noogu wacan oo faqriga keenay

Waa qabiilka loo faytayoo laguna faanaaye

Fajaaskana waxaa lala dhacaa oo la faramuuqi

## Q

## 28. QALAD QALAD LAGU SAXAY

Dadkaygaan qoomamiyo quus qoorta loo suree

Qoraxdii soo baxdaba qacdiyo qaylada uun maqal

Qabardaarkana ahoo wixii ciil uun qabsay

Qaafil weli sii ahoo qaafana sii dabar go’ee

Qaafiri quud lagu karshiyo qasac weelkoodu yahay

Dulli lama qaato ee intaad qaab u fekertaan

Ma quus baad kaba tihiin waxaan idin qaribaya?

Haddaad qur baxaysana dhareer layskuma qubee

Qodbaa laysaga duwaa waxaan ku qaadma hayn

Maxaad qaash iyo qafaal u wada qoor dhiibataan?

Qarankii waa burburay caruurtii waa qawadday

Kuwana waa qaxootiyoo qoom kalay qada haybsadaan

Qalalaasa aan harayn dowlad qurunaa ka roon

Qalad qalad lagu saxaan runtii qurux keenahayn

Qabiil loo dirirana qaneecaad laguma helo

Qalabka intaad dhigtaan qaraar loo wada dhan yahay

Qofina aan laga tagayn qalin wada saara oo

Qardoofada reeba oo qardada meel naga dhigoo

Qarracan waxaa noogu filan wixii inna qurunsadee

Qabsada qawlkii Ilaah runtii aan lagu qadayn

Qatanka aan dhaafno oon qayax wada raadsannee

Qaylada naga demiya oo qayrkeen aan daba gallee

Ha qiimaynina adduun qayd baa naga raacayee

Qiyaamada eega oo Qaaddir aan wada qirno

## 29. MAANTOW

## QORAALKAYGA QAAD

Maantow qoraalkeyga qaad waan qarqarayaaye
Qabow iguma dhicin ee waxaan qaadan kari waayay
Qaraxyadan dhacaayoo qalqigu qaatin ka istaagay
Ummaddaan la qowracahayoo qiilna lagu sheegan
Qoryahaan la deegaystayoo quudka laga raadsan
Qarankaan la kala qaybiyoo cidi ka qiiroonin
Bililiqadan qiyaas beeshayoo qaaradaha gaadhay
Qarniyaal qasaan laga baxayn qarada tiisaaba
Quus iyo waxay nagu rideen qoomamiyo hooge
Fariinteyda qaybsii intii Qaaddir ku ag geeyo
Qudhoo layska jara uun haddii qiima lagu yeelan

## 30. QADDAR EEBBE

Wax qorshaysataa ama qortaa qaabka taladaada
Qaddar Qaaddir qorayaan sinaba loo qadfayn karine
Qiiq iyo haddii aad gashaa qaraxya waawaynba
Qawda hore haddii uu qalbigu quusto weligiina
Qadaf laguma qawlee hadduu qiiqu wada qaado
Qamac kulul haddii lagugu qubo qiyaas la’aaneedna

Qaaddirkeen hadduu qoray inaan qaraf yar ay gaarin

Qamacdiyo kulaylkii la qubay qawi ma yeeshaane

Qisadaani waa qawl runoo Qaaddir noo qoraye

Qabow iyo ninkii qayr rabow qaado qoraalkaygan

Qayr adiga Qaaddir kuu qoraan qofina kaa qaadan

Qaylisaa, quusataa ama qabaw u qawshaaba

Qaxar iyo gashaa qoomamiyo qadafyo waawaynba

Qaybtaada waad qaadan waqtigii Qaaddir kuu qoraye

Qalqigaan qiyaastaa aqoon qoomamoon badane

Qalad iyo waxay gelahayaan qadafya waaweyne

Qunyar may u qaataan wixii Qaaddirkood qoray?

Qalqigoo qarsoon yuuba qoray annaga quudkeenna

Qaabkaa waxaa loogu qoray waa qadarinteene

Qabow iyo ninkii qayr rabow qaado qoraalkaygan

# M

## 31. MIDNIMO

Ummad yahay macluul baan ahayn tan iyo maantoo e

Laf iyo maqaar bay noqdeen mahaya moogtiiye

Maantana mahaysataanu nahay magaca Soomaali

Murrugmaarrugtaan soo marriyo mamacyadii jaane

Murugiyo mahiigaan colaad wixii na maan doorshay

Mushkiliyo masiibiyo wixii maag na daba yiillay

Madfaciyo intuu moortar dilay amaba maanshootay

Dal kalena intii magan gashoo magay hoyaadaysay

Macruuf baan u wada nahay wixii mooraduug dhacaye

Ku magaagnay nabadaan innagu mool isaga tuurray

Milga malahan kuwii aan nabadda muudsan kara haynin

Innagaan mudnaan aan lahayn laga macaashaaye

Kuwa nabadda noo miisi aan daba madiixayno

Kana maarmi mayno haddaan muran la doonayne

Runtii aan la mahadin dadow maagga na dhex yaale

Ha lagu magoolee war hooy talo an maarayno

## 32. DHADHAMINTA MOWDKA

Mowku waa masala yaab lahoo Mowle uun garane

Midkastoo naf lagu beerayaan muran ka taagayne

Dhadhaminta mowdkana marnaba lagama meermeero

Mallaay mool ku jira ama maskii moqor ku noolaahi

Masuul iyo midkii aan Macbuud magac u meelaynba

Mid xaaraanta muudsanahayoo Mowle iska diida

Iyo kii macaasidaa nacoo Mowle ku xirnaada

Midkastaba markii loo gartaa ruuxa laga miisan

Anigoo middaa garanayoo muran ka keenaynin

Ayaan mahadha hoosiya qabaa murugo ii gaara

Mushkilada waxaa iigu wacan oon la mehanaabi

Inta magaca Soomaaliyeed geeri mudatoo dhan

Mooryaan hubaysani intay madaxa goynaysa

Inta maarta baadiya naflay miratayoo laysay

Madfacana intuu xubin ka jarey amaba mowteeyay

Inta gaaja mudatoo sidaas iilka lagu moosay

Maskaxdayda kaba weyn inaan miin ka tiriyaaye

Inta mowd ka qaaday naftay weheshi moodaysay

Inta madigay dhowranahayeen maanta laga qaaday

Ama maatidoodii go'een murugo luudaaya

Ha murgoon mar uun baa Ilaah maarayn arrintiina

W

## 33. WAX LA YIRI

Waynow wax baan tabanayaa waanan kuu warine

Waqay waa mid aan rabay inaan waayin weligeeye

Waaxid baana garanoo aniga waygu weyn yahaye

Wacad iyo midkii aan marnaba weedhii aan beenaynin

War xun sheeg midkii aan ahayn caasin waalidkiisa

Waa loo addeecaa warkuu Wayne ku yiraahdo

Ana waaya idil baan wardiya waysa daa'imaye

Sacbahaan intaan waafi furay Waynow aan iriye

Wasiilayn wixii aan wadoon waqaf sameeyaab

Soomaali weyn waxaan iraa Waaqow magan taaba

Wax la yiri wada hadal tageen wadara joogaane

Wax la yiri heshiis yaa halkaas wagac la soo siiyay

Waaqow adaan waayin talo wabax ku gaadhnaaye

Warmayntiyo waxyeeladi dhammaan lagaba waantowye

Ka soo waaqsanaye waan qabnaa waana inna deeqda

**H**

## 34. HORORKI WEEYAANE

Howow hamuun uma aan qabin gabaya howshiise

Waxsaan haabtay qalinkii markaan hoos isula showray

Hadalkaagii hufnaa ee ahaa inaad hoyaadayso

Hamigeeni buu hoos u dhigay soo hambaabiraye

Ciidamada hubaysane adigu aad horkacahaysay

La hilmaami waa howl waxay kala hufaayeene

Admiral Ilaah hiba gelshoo heelan baad tahaye

Adaa hoor ka soo qubay kuwii hoogga nagu miisay

Adaa diifta naga hoorshayoo hiilna noo galaye

Kuwa ku hiifi waa habaclayaal horumar diidaaya

Hablihiyo ciyaalkeenu waa halalacleeyaane

Beerihii haruur lagu shubyoo gaaja horuu dhaafnay

Hambalyiyo salaan qayr qabtaan ku huwinaynaaye

Haddaad naga tegaysood kollay naga hoyaadayso

Ha i nagu halaynin kuwaan hororki weeyaane

Iminkayna hodayaan markaad naga hor bayrtaaaye

Habsamida adeegaagu waa hiba Ilaaheeye

Inkastood halyeeyo aad lahayd howsha kugu kaala

Harraad iyo kulayl waa kuwaan kaba hakoonayne

Halaag iyo waxay naga korsheen holac na naafeeyay

Nin hanasa mooyee ninkii horumar doonaaya

Hiilya hooba waa inuu la harin haatan dabadeede
Shirar dib u hesheesiina waxaad kala habaysaaba
Ummad kala hinaastayoo midiba qodoba jaan haysto
Odayaal hororohoo wax uun boqonta heeraaya
Kor iyo hoosba waxaad uba tiraa nabad u howshooda
Hal bacaad ku lisay dheheen waxaad ku hiiqaysay
Bela lagu hadaaqiyo dab uun hurinti mooyaane
Laga waa hindisa qayr qaboo haakah lagu gaaro
Hadaad naga tegeysood kolley naga hoyaadayso
Ha innagu halaynin kuwaan hororki weeyaane
Iminkay na hodayaan markaad naga hor bayrtaaye

## 35. HASID NAGA DUL QAADOW

Imaamkii Hiraabow halyeey hanadaa tahaye
Hogaamiye dhaqameed hamuun loo qabaa tahaye
Haakaanu leenahay waxaad kala hufaysoo dhan
Hormood weyn ayaad tahay Ilaah hiba u miisoowe
Haaneed in loo wada hadloo haarid la illaawo
Habarwacasho oo idil inaan hakinno oon dayno
Hahda inaan ilawnana adaa hoosta ka harriiqay

Wixii inna hodaayoo dhan baad naga horjoogtaaye
Haddii hagaag loo wada hadloo hagag la doonaynin
Hasid naga dulqaadow miskiin hoog tiraa tahaye
Inna horkac halkaad nagu waddaa lagu hodmaayaahe
Halaasooyin badanoo halaag hoosta ka xambaarsan
Hagardaama iyo hawkariyo holac la diidaaba
Ninka naga horjoogaad tahoon ku haminaynaaye
Hidde waxaad u leedahayna waa libin la haaneedsho
Horor inaan wax lagu keenahayn harbiska mooyaane
Howtulhamagna hoog yahay dadkii waa hifanayaaye
Waa laguu hiloobaye horfiiq heellan baad tahaye
Nin heshiiska jecelaad tahoo haybad soconaaya
Haddii hagaag loo wada hadloo hagag la doonaynin
Hasid naga dulqaadow miskiin hoogtiraa tahaye
Inna horkac halkaad nagu waddaa lagu hodmaayaahe

## GUNAANAD

Waxaan rejaynayaa in aad ka bogateen maansadan nabadaynta iyo dib u heshiisiinta uu yahay nuxurkeedu. Inkastoo suugaanlaydii UNOSOM howlgelisay ay dadaaleen, haddana dagaaladii iyo is nacaybkii ma dhammaan oo illaa iyo iminka dalku nabad waa ka dheer yahay.

Waxaan Eebbe ka baryayaa in gabayadan nabadeed iyo dib u heshiisiineed ay saamayn wanaagsan oo aan dhammaan ay ku sii yeeshaan Soomaalida oo dhan meel kasta oo ay adduunka ka deggan yihiin. Nabad iyo caano ayaan u rejaynayaa dadkayga Soomaaliyeed oo aan aadka u jeclahay. Eebbe ha siiyo nabad iyo caafimaad ay mahadiyaan.

Dalal badan ayaa colaado la ciirciiraya oo qaar kalena dhawaan ayay ka soo baxeen dagaallo sokeeye oo ragaadiyay. Wadamada weli dagaaladu ka socdaan Eebbe nabad ha siiyo oo kuwa dhawaan ka soo baxay colaadahana Eebbe ha u fududeeyo ka soo kabashada burburka gaaray dalalkooda.